



GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ)

ASTAYNTA AWODAHA HAY'ADAHA DOWLADDA

Muqdisho, Soomaaliya

December 2022

## GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ):

- Markuu Tixraacay: Warmurtiyeedka iyo Jadwal hawleedka Shirkii GWQ ee 31 October, 2022;
- Markuu Arkay: Qdobka 54aad ee Dastuurka KMG ah oo faraya in laga wada xaajoodo astaynta awoodaha ee u dhixeeya Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladahaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya;
- Markuu Garowsaday: Difaaca dalka, gobannimada iyo midnimada qaranka, ay yihiin arrimo laguma-xadgudbaan ah;
- Markuu Ka-ambaqaaday: Aragtida “Soomaali heshiis ah, dunidana heshiis la ah”;
- Markuu Hubiyey: Mas'uuliyadda fulinta adeegyada in loo dhiibo hadba heer xukuumadeedka awood ku filan u leh, sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta, uguna dhow muwaadinka adeega loo qabanaayo;
- Markuu Garowsaday: Ahmiyadda weyn ay leedahay in uu jiro xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhixeeya Dowladda Federaalka, Dowladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dhexdooda;
- Markuu Garwaaqsaday: Muhiimadda ay leedahay in la xoojiyo jiritaanka dareen midnimo qaran si degaan kasta oo ka mid ah Jamhuuriyaddu Federaalka ah ee Soomaaliya loo gaarsiiyo adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah.

WUXUU GO'AAMIYEY QODOBBADA SOO SOCDA:

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dowlad ku dhisan nidaamka federaalka oo saldhig u ah astaynta awoodaha ay kala yeelanayaan heerarka dowladda. Heer walba ee dowladeed wuxuu leeyahay awoodo cayiman. Awoodahaas waxay noqon karaan kuwo heer kasta gaar u ah ama kuwa ay wadaagaan. Awoodaha haraaga ah ee aan caddeyn waa laga tashanayaa, waxaana qabanaya hadba heerka lagu heshiiyo. Ujeeddada Astaynta Awoodaha waa in mawaadin kasta goobta ugu dhow uu ka helaa adeegyo waafi ah.

Mabaadi'da Muhiimka ah oo ay ku saleysan tahay Astaynta Awoodaha:

Si waaafaqsan axkaamta Qodobka 50aad ee DKM ah oo qeexaya mabaadii'da federaaleyn JFS, mabaadi'da guud ee hagaya astaynta mas'uuliyadaha waxaa ka mid ah:

1. Inuu jiro xiriirro iskaashi iyo istaageerid labo-dhinacle ah oo ka dhexeeya Dowladda Federaalka, Dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka iyo DXFD dheddooda
2. Muwaadin walba meel kasta uu ka joogo dalka inuu helo adeegyo iyo waxqabad xukuumadeed oo isku mid ah.
3. Mas'uuliyadda fulinta adeegyada waa in loo dhiibaa hadba heer xukuumadeedka awood ku filan u leh, sida ugu wax-ku-oolsan u fulin karta, uguna dhow muwaadinka adeega loo qabanaayo. Tusaale ahaan, adeegyada nadaafadda waxaa fulinaya degaannada, laakin maamulka hawada waxaana yeelanaya DFS.
4. Marka awoodda la astaynayo Awoodaha waxaa saldhig u ah in la tixgeliyo:
  - a. Mas'uuliyadda dejinta siyaasadaha, xeerarka, halbeegyada iyo korjoogteynta.
  - b. Mas'uuliyadaha maamulka ee fulinta.
  - c. Mas'uuliyadda maaliyadeed ee la xiriirta fulinta awoodaha.
5. Awoodaha loo gaar yeelay heer federal, Dowladda Federaalka waxaa ay yeelanaysaa dhammaan mas'uuliyadaha dejinta siyaasadaha, xeerarka, halbeegyada iyo korjoogteynta, sidoo kale maamulka iyo fulinta awoodahaas iyo maalgelinteeda.
6. Awoodaha u gaarka ah heer dowlad goboleed, dowladaha xubnaha ka ah federaalaka waxaa ay yeelanayaan dhammaan mas'uliyahada dejinta siyasadaha, xeerarka, halbeegyada iyo korjoogteynta, sidoo kale maamulka iyo fulinta awoodahaas iyo maalgelinteeda.
7. Awoodaha wadaagga ah, mas'uuliyadda dejinta siyaasadda, xeerarka, halbeegyada iyo korjeeogteynta waxaa si guud u leh Dowladda Federaalka. Fulinta iyo dhaqangelinta awoodaha wadaagga ah waxaa si guud iska leh Dowlad Goboleedka. Mas'uuliyadda maaliyadeed waa wadaag iyadoo lagu saleynayo hadba awoodda la asteeyay inta ay la egtahay.

8. Mas'uuliyadaha haraaga ah ee aan caddeyn waxaa qabanaya hadba heerka lagu heshiyo.

### Jadwalka Astaynta Awoodaha

Jadwalka hoose wuxuu qeexayaa awoodaha u gaarka DF in ay yihiin 44 awoodood, awoodaha u gaarka ah DXDF 29 awoodood, awoodaha Dowladaha Hoose 31 awoodo iyo Awoodaha Wadaagga ah oo ah 19 awoodood. Sidaas awgeed, awoodaha guud ee dawladda Soomaaliya waa 123.

1. AWOODAHA U GAARKA AH DF	
Awoodaha Guud	<ol style="list-style-type: none"> <li>Ilaalinta iyo difaaca Dastuurka Qaranka.</li> <li>Ilaalinta midnimada dalka iyo madax-bannaanidiisa.</li> <li>Aftida Dastuurka Qaranka.</li> <li>Arrimaha dibadda iyo xiriirada dublomaasiyadeed ee caalamiga</li> <li>Axdiyada Caalamiga ah iyo heshiisyada laba dhinaclaha ah ee lala galayo dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah.</li> <li>Arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka.</li> <li>Siyaasadda ilaalinta Diinta iyo Awqaafta.</li> <li>Ilaalinta xuquuqda iyo xurriyadaha uu Dastuurku Federaalka dammaanad qaaday.</li> <li>Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee Dadweynaha.</li> <li>Siyaasadda diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka iyo furiinka.</li> <li>Siyaasadda guud Arrimaha Xisbiyada iyo doorashooyinka dalka.</li> <li>Maamulka doorashooyinka (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer).</li> <li>Siyaasadda qaran ee arrimaha dhulka, badda iyo hawada.</li> <li>Ilaalinta xuduudaha dhulka, badda iyo hawada.</li> <li>Diiwaangelinta iyo ilaalinta xuquuqda hal-abuurka (Copy right).</li> <li>Shaqaalaha rayidka ee heer federal.</li> <li>Siyaasadda qaran ee mihnadleyaasha iyo ruqsadahooda.</li> <li>Halbeegyada la xiriira cabiraadda iyo miisaanka.</li> </ol>
Dhaqaalaha	<ol style="list-style-type: none"> <li>Qorshaha qaran ee horumarinta dhaqaalaha.</li> <li>Siyaasadda lacagta.</li> <li>Go'aaminta ilaha dakhliga, soosaarista canshuuro ugaar ah DFS iyo dajinta, ansixinta iyo maamulidda miisaaniyadda guud ee Federaalka.</li> <li>Istatistikada Qaranka.</li> <li>Wabiyada isku xiraya laba DXDF ama ka badan ama ka imaanaya dibadda xudduudaha gayiga qaranka.</li> <li>Siyaasadda iyo shuruucda ganacsiga dibadda.</li> <li>Maalgashiga Caalamiga.</li> <li>Siyaasadda guud ee tamarta iyo biyaha.</li> </ol>

Gaadiidka Iyo Kaabayaasha	27. Dekadaha iyo garoomada diyaaradaha caalamiga. 28. Waddooyinka isku xira labo DXDF ama ka badan. 29. Siyaasadda gaadiidka dhulka, badda iyo cirka. 30. Maamulka duulista hawada iyo gaadiidka badda. 31. Boostada, Koodka Soomaaliya ee (252), Koodka Internet-ka (.SO), astaynta mowjadaha maqal iyo maqal-aragga, Siyaasadda Ammaanka Internet-ka (Cyber Security), ilaalinta xogta (Data protection) iyo siyaasadda isgaarsinta iyo warfaafinta.
Amniga iyo Cadaaladda	32. Difaaca Qaranka iyo Ciidanka Xoogga Dalka. 33. Dhisidda Boliis Federaal ah iyo Sirdoonka Qaranka. 34. Soo celinta amniga iyo xasilloonida marka DXDF ay la soo gudboonaadaan qalalaase ka baxsan awooddooda marka ay DF iyo DXDF ay khuseyso ka heshiiyaan. 35. Habraacyada nidaamiya hubka fudud iyo saanadda ee gaarka looleeyahay. 36. Golaha Sare ee Garsoorka, Maxkamadda Sare ee federaalka, Maxkamadda Dastuurka iyo xeer-ilaalinta guud ee qaranka. 37. Maxkamadda ciidamada qalabka-sida ee heer federaal.
Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada	38. Siyaasadda qaran ee caafimaadka. 39. Siyaasadda tayadhawrka agabka, dawooyinka iyo cuntada. 40. Arrimaha qaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha. 41. Siyaasadda daryeelka bulshada. 42. Nidaaminta iyo maamulka xarumaha qaran sida: - Matxafyada - Maktabadaha - Tiyaatarrada iyo garoomada ciyaaraha
Waxbarashada	43. Siyaasadda qaran ee waxbarshada dalka, hannaanka dejinta manhajka iyo imtixaannada shahaaddada dugsiga sare. 44. Siyaasadda qaran ee tacliinta sare, tiknoolijiyada iyo hay'adaha cilmibaarista.
<b>2. AWOODAHA U GAARKA AH DXDF</b>	
Awoodaha Guud	1. Soo saaridda iyo ku dhaqanka dastuur iyo shuruuc u gaar ah DXDF oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda Federaalka 2. Maamulka doorashooyinka heer DXDF iyo heer deegaan (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer) 3. Dejinta siyaasad dhuleed ee DXDF. 4. Hirgelinta istiraatijiyyadaha gargaarka iyo maareynta musiibooyinka 5. Taabbagelinta siyaasadda dowladaha hoose 6. Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta reer miyiga 7. Soo-saarista iyo hirgelinta shuruucda shaqaalaha rayidka DXDF.
Dhaqaalaha	8. Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta dhaqaalaha ee DXDF 9. Qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda horumarineed ee DXDF 10. Ururinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah DXDF

	<p>11. Diyaarinta iyo maamulidda miisaaniyadda DXDF      12. Diiwaangelinta shirkadaha ka shaqeeya DXDF.      13. Taaba-gelinta siyaasadda beeraha, waraabka iyo cilmibaarista.</p>
Gaadiidka Iyo Kaabayaasha	<p>14. Garoomada diyaaradaha ee maxalliga      15. Diiwaangelinta iyo bixinta taarkada iyo ruqsadda gadiidka      16. Ruqsadda gaari wadista      17. Dhisidda iyo dayactirka waddooyinka DXDF      18. Maamulka warfaafinta iyo isgaarsiinta DXDF</p>
Amniga iyo Cadaaladda	<p>19. Dhisidda iyo maamulidda ciidanka booliska DXDF/daraawiishta      20. Dhisidda, tayaynta iyo tababarka ciidanka ilaalada deegaanka      21. Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadda Darajada Kowaad ee DXDF, iyo xafiiska Xeer-ilaalinta DXDF.</p>
Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada	<p>22. Nidaaminta iyo korjoogteynta isbitaallada iyo goobaha caafimaad      23. Nidaaminta iyo maamulka xarumaha DXDF sida:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Maktabadaha,</li> <li>- Matxafyada</li> <li>- Beeraha Nasashada</li> <li>- Xarumaha hiddaha dhaqanka</li> <li>- Dalxiiska iyo xeebaha.</li> <li>- Tiyaatarrada iyo Garoomada ciyaaraha</li> </ul> <p>24. Taabbagelinta siyaasadda qaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha      25. Bixinta adeegyada tamarta iyo biyaha      26. Siyaadaha DXDF ee Diiwaangelinta dhalashada , dhimishada iyo guurka iyo bixinta wargadaha aqoonsiga.</p>
Waxbarashada	<p>27. Qorshaha horumarineed iyo baahinta waxbarashada dugsiyada hoose, dhexe iyo sare      28. Imtixaanaadka iyo shahaaddada dugsiyada hoose/dhexe      29. Maamulidda dugsiyada sare iyo macaahidda farsamada gacanta</p>
<b>3. AWOODAHA WADAAGGA AH</b>	
Awoodaha Guud	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. La-dagaallanka nabaadguurka, ilaalinta deegaanka iyo duurjoogta.</li> <li>2. Arrimaha shaqaalahaa dowladda iyo shaqaalahaa gaarka ah</li> <li>3. Horumarinta iyo kobcinta awoodaha maamullada dowladaha hoose</li> <li>4. Warfaafinta</li> <li>5. Gargaarka iyo maareynta musiibooyinka</li> <li>6. Ilaalinta ilaha iyo kaydka biyaha</li> <li>7. Horumarinta xannaanada xoolaha</li> <li>8. Qorshaha horumarineed ee waxbarashada iyo illaalinta tayadeeda.</li> </ol>
Dhaqaalahaa	<ol style="list-style-type: none"> <li>9. Arrimaha kheyraadka dabiiciga ah.</li> <li>10. Arrimaha dalxiiska</li> <li>11. Goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah ee qaranka</li> <li>12. Beeraha iyo waraabka</li> <li>13. Kalluumaysiga iyo khayraadka badda</li> </ol>

	14. Nidaaminta ganacsiga u dhexeeyaa DXDF.
Amniga iyo Cadaaladda	15. Ka hortagga faldambiyedyada abaabulan 16. Arrimaha Xabsiyada
Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada	17. Tallaalka iyo ka hortagga cudurrada faafa 18. Ilaalinta tayada iyo korjoogteynta adeegyada caafimaadka 19. Tayaynta kuliyadaha caafimaadka, iskuullada kalkaaliyayaasha iyo xirfadleyda caafimaadka 20. Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka ah qabo
4. AWOODAHA U GAARKA AH DOWLADAH HOOSE	
Awoodaha Guud	1. Isku-duwidda iyo habsami u socodka howlaha maamulka degmada 2. Naqshadaynta degmada, ruqsadaha dhul bixinta iyo dhismooyinka
Dhaqaalahaa	3. Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda horumarinta dhaqaalahaa Degmada 4. Dhawrista deegaanka 5. Maamulka goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah ee degmada 6. Horumarinta dalxiiska 7. Uruurinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah Dowladaha Hoose 8. Bixinta shatiyada goobaha ganaciga 9. Suuqyada iyo kawaannada 10. Kalluumeyisiga maxalliga 11. Nidaaminta iskaashatooyinka
Gaadiidka Iyo Kaabayaasha	12. Nidaaminta gaadiidka dadweynaha 13. Dhisidda, dayactirka iyo iftiiminta waddooyinka
Amniga iyo Cadaaladda	14. Maamulidda amniga iyo xasiloonda Degmada 15. Ilaalinta anshaxaa iyo asluub wanaagga dadweynaha
Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada	16. Kobcinta daryeelka caafimaadka asaasiga ah 17. Horumarinta Isbitaallada hooyada iyo dhallaanka 18. Goobaha adeegyada caafimaadka sida farmashiyada iyo adeegga ambalasyada 19. Nadaafadda iyo fayadhowrka deegaanka sida qashinka, wasakhda iyo sunta IWM 20. Kormeerka tayada cuntada, hoteelada, maqaayadaha iyo guryaha dadweynaha 21. Nidaaminta Xabaalahaa 22. Adeegyada xannaanada xoolaha 23. Horumarinta iyo tayaynta arrimaha dab-demiska 24. Korjoogtaynta adeegyada korontada iyo biyaha 25. Horumarinta dhalinyarada iyo Isboortiga 26. Maamulka arrimaha dhaqanka, beeraha nasashada iyo xeebahaa 27. Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka qabo 28. Diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka iyo bixinta waraaqaha sugnaanta dhalashada

	29.Taakuleynta qaxootiga iyo barakacayaasha si waafaqsan shuruucda dalka
Waxbarashada	30.Maamulka waxbarashada ee dugsiyada hoose, dhexe iyo sare 31.Waxbarashada dadka waaweyn 32.Fulinta Siyaasadda Dhiirigelinta waxbarashada Islaamka ee asaasiga ah sida dugsiyada qur'aanka iyo masaajidda.

5. AWOODAHA HAY'ADAHA XEER-DEJINTA	
Awoodaha Xeer-dejinta/BFS	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha Dastuurka ku xusan.</li> <li>2. Xeerdejinta awoodaha u gaarka ah DFS.</li> <li>3. Soo saarista xeerar nidaaminaya hannaanka federaalka qaranka iyo jaangoyn ta halbeegyo midaysan ee awoodaha wadaagga ah kadib marka lagala tashado DXDF.</li> <li>4. Ansixinta axdiyada Caalamiga ah iyo heshiisyada laba dhinaclaha ah ee ay DFS la galayso Dowladaha/hay'adaha kale.</li> <li>5. Hay'adaha xeer-dejinta ee labada heer waxay midba mida kale u igman kartaa qaar ka mid ah awoodahooda.</li> </ol>
Awoodaha Xeer-dejinta/Baarlamaanka DXDF	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha ku xusan Dastuurka DXDF ee aan ka hor imaaneyn Dastuurka Federaalka.</li> <li>2. Xeerdejinta awoodaha u gaarka ah DXDF.</li> <li>3. Soo saarista xeerar lagu fulinayo hannaanka federaal iyo jaangoyn ta halbeegyada midaysan ee uu soo saaray BFS.</li> </ol>
Awoodaha Xeerdejinta Golayaasha Deegaanka ah ee Dowladaha Hoose	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha ku xusan Dastuurka DXDF</li> <li>2. Awoodaha u gaarka ah Golayaasha Deegaanka ee ku xusan heshiiska astaynta awoodaha</li> <li>3. Awoodaha ay u igmadeen DXDF</li> </ol>
6. AWOODAHA HAY'ADAHA FULINTA	
Awoodaha Hay'adaha Fulinta DFS	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha Dastuurka ku xusan.</li> <li>2. Fulinta awoodaha u gaarka ah DFS.</li> <li>3. Dejinta siyaasado qaran, xeer nidaamiyeyaa iyo halbeegyo lagu fulinayo hannaanka federaalka qaranka iyo dhamaystirka dhismaha hay'adaha federaalka ah ee dastuuriga ah</li> <li>4. Dejinta habraacyo iyo halbeegyo (standards) midaysan ee awoodaha wadaagga ah kadib marka lagala tashado DXDF.</li> <li>5. Hay'adaha fulinta ee labada heer waxay midba mida kale u igman kartaa qaar ka mid ah awoodahooda.</li> </ol>
Awoodaha Hay'adaha Fulinta DXDF	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha ku xusan Dastuurka DXDF ee aan ka hor imaaneyn Dastuurka Federaalka.</li> <li>2. Fulinta awoodaha u gaarka ah DXDF.</li> </ol>

	<p>3. Soo saarista xeer-hoosaadyo lagu fulinayo hannaanka federaal iyo siyaasadaha midaysan ee ay soo saarayaan hay'adaha fulinta qaranka.</p>
Awoodaha Fulinta ee Dowladaha Hoose	<ol style="list-style-type: none"> <li>1. Awoodaha ku xusan Dastuurka DXDF</li> <li>2. Dejinta siyaasado lagu xaqiijinayo gudashada howlaha iyo ujeedooyinka loo dhisay dowladaha hoose.</li> <li>3. Bixinta adeegyada dadweynaha ee sharcigu u oggol yahay, sida ugu habboon.</li> <li>4. Qoondaynta dhaqaale ku filan fulinta howlaha dowladaha hoose.</li> <li>5. Awoodaha u gaarka ah Golayaasha Deegaanka ee ku xusan heshiiska astaynta awoodaha</li> </ol>